

Shaqaalaha Ka Jawaaba ee Gaarka ah ee Qoyska

Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiyo



(S) Waa maxay Shaqaalaha Ka Jawaaba ee Gaarka ah ee Qoyska?

(J) Janaayo 27, 2025, Badhasaab Bob Ferguson waxa uu saxeexay **Amar Fulin 25-04** oo lagu taageerayo caruurta waalidkood ama daryeelayaashoodu xidhan yihin ama la mastaafurinayo. Shaqaaluhu waxay ku taliyaan siyaasado iyo talaabooyin lagu caawinayo caruurtan iyo qoysaskooda.

Shaqaaluhu waxay ka kooban yihin wakiilo:

- Department of Children, Youth & Families (Waaxda Carruurta, Dhalinyarada & Qoysaska, DCYF) ee Gobolka Washington
- Xafiiska Badhasaabka
- Ilaalada Gobolka Washington
- The Office of Refugee & Immigrant Assistance (Kaalmada Xafiiska Qaxootiga iyo Caawinta Socdaalka)
- Xafiiska Qareenka Guud ee Gobolka Washington
- Cid kale oo gobolka lagala shaqeeyo

(S) Sidee ayay Shaqaaluhu ay u caawinayaan caruurta iyo dadka yaryar?

(J) Shaqaaluhu waxay ka shaqeeyaan abuurista nidaam cad oo waxa dhici doona ah marka ilmaha laga kaxeyyo qoyska maadaama oo la xidhay ama la mastaafurinayo. Si taas loo sameeyo, waxay ka shaqayn doonaan in:

1. La fahmo nidaamka wakhtigan
2. La ogaado khayraadka qoysaska
3. La sameeyo talooyin siyaasadeed oo lagu hormarinayo adeegyada taageerada

(S) Waa maxay waxyaabaha u qabsoomay Shaqaalahan ilaa iminka?

(J) Kooxda waxay qabsatay kulankoodii kowaad Febraayo 11, 2025, oo iminka waxay kulmaan sadex todobaad oo kasta. Waxay wakhti xaadirkan uruurinayaan macluumaadka siyaasada iyo nidaamyada hore.

Yoolka ugu muhiimsan waa in la abuuro liiska khayraadka ka caawinaya qoysaska inay helaan kaalmo sharci, adeegyada cafimaadka maskaxda iyo taageero kale. Macluumaadkan waxaa lasoo dhigo doonaa webpage Kooxda Ka Jawaabida gaarka ah ee: <https://dcyf.wa.gov/EOTaskForce>.

(S) Maxaa dhacaya marka waalidka ay qabtaan Immigration and Customs Enforcement (Ciidanka Laanta Socda iyo Kastamyadu, ICE)?

(J) Marka ICE ay xidho waalidka, marka kowaad waxay waydiinayaan qoyska hadii ay leeyihiiin qaraabo ama saxiib daryeeli kara ilmaha.

ICE waxay kaliya la xidhiidhaa DCYF hadii:

- Waalidku aanu lahayn ruux amaan ah oo daryeeli kara ilmaha.
- Waxaa jira walaacyo ku saabsan ruuxa loo doornayo daryeelka ilmaha.

Hadii ay sidaasi dhacdo, ICE waxay wargelin doontaa ciidanka bilayska deegaanka oo ilmaha ayaa lagu wareejin doonaa gacan ku haynta amaanka ah ee DCYF.



<p>S Waa maxay kaalinta DCYF marka waalidka la mastaafurinayo ama la doonayo in la mastaafuriyo?</p> <p>J DCYF si toos ah uguma lug laha kiisaska mastaafurinta. DCYF waxay gacanta la gashaa hadii waalidka uu waayo daryeele ku haboon ama ay jiraan calaamado cad oo tacadi, dayacaad, ama khatar waxyelo oo ilmaha ah.</p> <p>S Maxaa dhacaya marka uu ilmuhi kaligii uu yimaado Maraykanka (isaga oo aan lala socon)?</p> <p>J DCYF kama shaqayso wakhti xaadirkan kiisaska caruurta kaligood ah.</p> <p>Hadii ilmaha ay qabtaan Ciidanka Ilaalada Xuduudka iyo Kastamka Maraykanku, waxaa loo wareejiyaa Waaxda Amaanka Arrimaha Gudaha ee Maraykanka.</p> <p>Wixii intaa ka danbeeyaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ilmaha waxaa lagu wareejiyaa Office of Refugee Resettlement (Xafiiska Dib u Dejinta Qaxootiga, ORR). • ORR ayaa u doonta cid kafaale qaada ilmaha. • Ilmaha waxaa lagu xidhaa adeegyada iyo nidaamka maxkamada ee laanta socdaalka. 	<p>S Imisa caruur ah ayaa gobolka Washington gudihiisa ayuu sameeyay xadhiga ama mastaafurinta waalidku?</p> <p>J DCYF ma uruuriso xogta ilmaha iyo qoyska ee ku saabsan xaalada laanta socdaalka.</p> <p>S Macluumaadkee, hadii uu jiro, ayay DCYF la wadaagtaa ICE?</p> <p>J DCYF lama wadaagto wax macluumaadka ICE bilaa amar maxkamadeed ama waaran xaakin, ama waalidka oo saxeexa moojee bixinta macluumaadka ee sheega macluumaadka la bixin karo.</p> <p>S Sidee ayaan ula socon karaa shaqada ay qabteen Kooxdu?</p> <p>J Fadlan booqo webpage Kooxda Ka Jawaabida Kala Taga Qoyska ee https://dcyf.wa.gov/ EOTaskForce si aad u hesho macluumaadka iyo khayraadka, oo isku duwaan geliso helitaanka iimeelka macluumaadka cusub.</p>
--	--